# Xaquuqda ah in ilmaha Naafada ahi ay helaan Adeegyada Xanaanadda Ilmaha

The Rights of Children with Disabilities to Get Services at Daycare

## Waa maxay naafanimo?

Guud ahaan Sharciga Xaquuqda Aadanaha ee Minnesota [Minnesota Human Rights Act (MHRA)] iyo kan Naafada Mareykanka [Americans with Disabilities Act (ADA)] waxay ku tilmaam naafo qofkii leh iin jireed ama mid maskaxeed oo si weyn u carqaladeeysa hal ama in ka badan oo ka mid ah waxyaabaha qofku qabsado.



Waxyaabaha waaweyn ee qofku nolosha qabsado waxaa ku jira, laakiin aad ku koobnayn:

- Is daryeelka qofku iskii isu daryeelo
- Araga
- Maqalka
- Hurdada
- Socodka

Waxyaabaha waaweyn ee qofku qabsado waxaa kaloo ku jira shaqada qofka qabto. Sida shaqooyinka habka difaaca cudurrada, dheefshiidka, saxarooka, qanjirada iyo xubnaha taranka ee jirka.

## Xanaano ilmo bixiye (day care) ma oron karaa ilmo naafo ma qabano?

Guud ahaan, sharcigu waxa u qabaa in ganacsiyada gaarka loo leeeyahay aysan takoori karin dadka naafada ah. Intooda badan goobaha xanaanada ilmahu waa kuwa gaar loo leeyahay. Goobaha xanaanada ilmaha ee ay leeyihiin iskuuladu ama ururada bulshadu sidoo kale waa inay sharciga u hogaansamaan.

## Ka waran hadii kaniisadi ay leedahay rug lagu xanaaneeyo ilmaha?

Qaar kaniisadaha ka mid ahi waxa ay kireystaan meel ilmaha lagu hayo. Hadii kaniisadi ay kireyso meel, kolkaa waa inay kala shaqeyso rugta xanaanada ilmaha sidii looga dhigi lahaa dhismaha mid la soo geli karo. Hadii su'aashani timaado, wac Hay'ada [Minnesota Disability Law Center (MDLC)] ama qareen kale si aad caawimaad uga hesho.

## Ka waran hadii xanaana-bixiye uu yiraa ma awoodo inaan adeegyo siiyo ilmo?

Ganacsigu waa uu diidi karaa inuu adeego bixiyo iyadoo sababtu tahay inay *taasi ku culus tahay*. Culuska siyaadada ah macnihiisu waa ay adag tahay in sharciga loo hogaansamo, oo waxayba keeni kartaa taasi in ganacsigu kaco. Hay'ada ADA iyo MHRA waxa ay keeyihiin xeerar ka duwan oo ku saabsan sida loo qeexo culuska siyaadada ah. Waxa ayna eegaan baaxada ganacsiga, kharashka adeegyada iyo arrimo kale oo badan.

Hadii bedelaad samayntu (gargaaridu) aysan suurta gal lahayn dhaqaale ahaan in ganacsigu sii furnaado, waxa ay oron karaan waa nagu culeys arrrintaasi, waxaana dhici karta inaysan khasab ku noqon inay bedelaadda sameeyaan.

Ganacsiyada yar yar ee ku kharash gareeya lacag siyaado ah si ay ugu adeegaan dadka naafada ah waxa ay in badan codsan karaan in canshuurta laga dhaafo. Hadii xarun xanaano ilmo ay tiraa ma awoodo inaan u adeego ilkmahaaga, u sheeg mulkiilahayaasha xarunta inay codsan karaan canshuur ka dhaafid. Dhaafidaas waxaa dhici karta inay ku aado kharashka.

## Ma khasab ay ku tahay in xarun xanaano ilmo ay bedesho dhismaha si uu ilmahaygu uu u dhigto xaruntaa?

Caadiyan haa, hadii uusan kharashku aad u badnayd (eeg kor) ama aysan kaniisadi lahayn xarunta. Laakiin, hadii uu yahay dhisme cusub (oo la dhisay ama la dayactiray ka dib 1992 dii) kolkaa xeerarka arrintaa qaabilsani waa adag yihiin. Waa inay *dadaalo macquul ah* la yimaadaan. Taa macnaheedu waa sameynta bedelaadyo si kolkaa dadka naaafada ahi ay ugu isticmaalaan dhismaha ama adeegyada si la mid ah sida kuwa dadka aan naafada ahayn.

Dhismayaashii hore ah, xeerarkoodu waa ay ladifan yihiin. Mar labaad, waydii qareen inuu ku caawiyo hadii su'aashani soo baxdo.



## Ma khasab bay ku tahay in xarun xanaano ilmo ay turjibaan u keento dadka dhagaha la'?

Marmarka qaarkood haa, Marmarka qaarkood maya. Waxa ay hadba ku xiran tahay in bixiddu ay "culaabta weyn" ku tahay rugta xanaanadda ilmaha iyo in kale. Culaabta weyn macnaheedu waa wax ay aad u adag tahay in la sameeyo ama kharash badan oo lacag ahi uu ku baxayo. Waxa maalin walba la qabto, waa aad bari kartaa shaqaalaha sida gacanta la isaga hadlo. Waa ay baran karaan gacan ka hadalka ku saabsan, cayaarta , musqusha iwm. Kolka la akhrinayo sheekooyinka, waa ay ku dari karaan sheeko akhriska ilmaha dhagaha la' iyadoo la tusayo sawiro. Waalidiintu badanaa waxa ay hayaan fikrado wacan oo ku saabsan sida ilmahooda looga qayb galiyo barnaamijyada. La hadal shaqaalaha kulana tali waxyaabaha ay sameyn karaan.

Xarunta xanaanada ilmahu waa inay keentaa turjubaan kolka ay jiraan hawlo gaar ah sida dibad-baxyada ama booqdayaasha.

## Ilmahaygu waxa uu u baahan yahay inuu ka helo adeegyo ka badan kuwa ilmaha faciisa la siiyo xarunta xanaanada ilmaha. Xarunta ma ku khasab baa inay siiso adeegyo siyaada ah ilmahayga?

Xarunta xanaanadda ilmaha khasab kuma aha inay siiso adeegyo siyaado ah. Adeegyo siyaado ah hadii ilmahaaga la siiyo waxaa dhici karta in ilmaha kale aysan helin adeegyadoodii.

Tusaale ahaan, hadii aad hayso ilmo lix jir ah oo u baahan in laga caawiyo cuntada, shaqaalahu ma gelin karaan ilmahaa qolka ilmaha markaa dhashay ku jiraan. Ilmahaaga waa inuu ilmaha la joogaa ay isku faca yihiin. Laakiin, qolkaa waxaa dhici karta inuusan ku helin caawimaada.

Hadii uu ilmahaagu u baahan yahay adeegyo ilmaha ay isku faca yihiin aysan u baahnayn, wac hay'ada adeega bulshada ee degmadaadda. Waxaa laga yaabaa inaad u hesho Adeegyada Haynta ah [Personal Care Assistant (PCA)] ama adeegyo kale si loogu caawiyo rugta xanaanada ilmaha. PCA waa qof ka caawiya ilmaha hawlaha nolol-maalmeedka, sida wax cunida, dhar xirashada, musqusha iyo qubeyska.

## Hadii aan heli karo PCA ama qof iga caawiya adeegyada siyaadadda ah, shaqaalaha xarunta xanaanadda ilmahu wali ma khasab baa inay la shaqeeyaan ilmahayga?



Ilmahaagu waa inuu helaa adeegyo la mid ah kuwa ilmaha kale ee kooxdiisa ah kolkii ay suurto gal tahay. Hadii ilmaha oo dhan laga caawiyo dhaqashada gacmahooda, kolkaa ilmahaagu waa inuu helaa cawimaadaa. Hadii shaqaalahu ka caawiyo ilmaha kale midabaynta sawirada ama ku ciyaarida alaabta waa in ilmahaagana laga caawiyaa kuwaa. Shaqaalaha rugta xanaanadda ilmahu iskama indho-tiri karaan ilmahaaga. Kala fili karaan in PCA gu qabto wax walba.

## Hadii shaqaalaha xarunta xanaanada ilmahu uu is yiraa ilmahaygu waxa uu khatar ku yahay amaanka ilmaha kale, rugta ma diidi kartaa ilmahayga?

Hadii ilmahaagu uu khatar toos ah ku yahay cid kale, rugta waa ay diidi kartaa inay ilmahaaga qabato. Tusaale ahaan, hadii ilmahaagu uu qaniino ilmaha kale, ama uu wadada u cararo hadii aan la ilaalin taasi waxaa loo arki karaa inay khatar ku tahay amaanka. Waxaa dhici karta inaad u baahato PCA si uu u siiyo ilmahaaga adeegyo dheeraad ah si uu amaan u noqdo. Go'aansiga in ilmahaagu uu "khatar toos" yahay iyo in kale waa khasab inay ku salaysan tahay qiimeyn shakhsiyan ah. Waa inay eegaan xarakaad cayiman iyo iinta dhabta ah ee ilmahaaga. Kuma ay salayn karaan fikrado guud iyo wax quraafaad ah iinta.

Hadii shaqaalaha xarunta xanaanada ilmahu ay bedelaan sida ay wax u sameeyaan , marmarka qaarkood, dhibku waaba iska dhamaadaa. Tusaale ahaan, waxa ay bedeli karaan jadwalka. Ama hadii qaarka ka mid cayaaraha ilmahu ciyaaraan uu dhibku yahay, waxa ay ciyaari karaan ciyaar kale kolka ilmahaagu u joogo xarunta xanaanada ilmaha.

Hadii xarunta xanaanada ilmahu ay isku dayday aysana u helin jid ay cid walba amaankeeda ku ilaaliso kolkaa waa ay idin diidi kartaa ilmahaaga.

## Ka waran hadii 1 ama 2 xarumood uun oo ilmaha jiran qaataa ay ku yaalaan magaaladayda kuwaasina ay buuxaan?

Hadii xarunta xanaano ay qaadato ilmaha jiran laakiin aysana qaadan karin ilmo kale oo ay buuxdo, kolkaa waa ay diidi kartaa inay ilmahaaga qaadato. Tusaale ahaan, hadii ay xaruntu hayso 4 ilmood oo naafo ah, ma ay takoorayso naafanimada ee ma qaadan karto ilmo kale.

Isku day siyaabo kale oo aad ula shaqeyn karto xarunta kale oo ilmaha lagu hayo. Hadii aadan heli karin jid uu ilmahaagu uga qayb geli karo barnaamijka iyadoon shaqaalaha aan hawl siyaado ah ku noqonayn, xataa xarun aan horey u hayn ilmo naafo ah waxaa dhici karta inay qaadato ilmahaaga.

PCA gu wax weyn ayuu ilmahaaga u noqon karaa. Waxaad kaloo siin kartaa shaqaalaha faah-faahino dheeraad oo ku saabsan cuntada. Ama, waxaa aad gelin kartaa barnaamijyo gaar ah qayb ka mid ah maalintii. Hadii aad adiga iyo xarunta xanaanadda ilmahu aad wada shaqeysaan, waxaa dhici karta inaad u hesho xarun xanaano ilmo iyadoo khasab aysan kugu noqon inaad hesho gargaar dhanka sharciga ah.

## Hadii aanan u helin xarun xanaano ilmahayga, ma heli karaa gargaar sharci?

Wac (Minnesota Disability Law Center). Hadii anaan kuu heli karin cid ku taakuleysa, waxaa laga yaabaa inaan ku siino talo aana kugula talino meelo kale oo aad aadi kartid si aad caawimaad uga hesho. Taakuleeyahu waa qof dhinacaaga ah oo kaa caawiya fahamka sharciga una dagaalama xaquuqdaadda. Taakuleeyahu waxa uu noqon karaa qareen ama qof kale oo fahamsan dhibkaaga kuna caawin kara.

## Sidee ayaan ula soo xiriiri karaa Minnesota Disability Law Center?

The Minnesota Disability Law Center waxa ay u fidisaa gargaar dhanka sharciga ah oo lacag la'aan ah dadka naafada ah ee Minnesota.



Si aad u codsato caawimaad, wac:
Beledyadda: (612) 334-5970
Telefoonka lacag la'aanta ah: 1-800-292-4150

Dhamaan wicitaanadda kale oo dhan: (612) 332-1441

Minnesota Disability Law Center
(Xarunta Sharciyada Dadka naafada Ah)
111 North 5th Street, Suite 100
Minneapolis, MN 55403

https://mylegalaid.org/disability-law-center/

*Diyaarinta Warqadan Xogta Aruursan ah waxaa maalgeliyey qayb ahaan deeq sumadeedu tahay 90DNO133 oo ka timid Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyadda Bulshada (Department of Health and Human Services), Maamulka Arrimaha Naafadda (Administration on Developmental Disabilities), Mashruucyo Heer Qaran ah oo hoos yimaada qaybaha Sharciga Dadkweynaha 106-402 (Public Law 106-402). Waxa ku qoran Warqadan Xogta Aruursan ahi ma aha muhimadeedu weyni inay muujinayso mowqif xeer maamul ah oo uu leedahay Maamulka Arrimaha Naafadda (Administration on Developmental Disabilities), ama Waaxda Maamulka ee Minnesota (Minnesota Department of Administration).*

***Xog Ururssan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan ururisan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**